

Falanqeynta Xulashooyinka Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta E

PPS Isbahaysiga Hagidda Koonfur-bari (Southeast)
ee Jiilaalka 2022
Janaayo 19, 2022

Janaayo 13, 2022, Isbahaysiga Hagida Koonfur-Bari waxay siiyeen Degmada iyo FLO Analytics xulashooyinka la cusboonaysiiyay ee ay ku sahamiyaan meelaynta Barnaamijiyada Laba Luuqad Wax-ku-barashada (DLI) iyo hubinta in Harrison Park iyo dugsiyada dhexe ee Lane la diwaangeliyo si ay u gaadhaan yoolka diiwaangelinta 2025-26 ee 500 oo arday ah.

Xulashooyinka Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta E waxay ku dhisan yihiin fikradaha soo socda ee meelaynta barnaamijka ee muhiimka ah. **Calaamadintu** waxa ay tilmaamaysaa isbeddelka taxanaha Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta D.

Isbaanishka DLI ee heerka K-5 waxaa laga bixin doonaa Lent (dugsiga oo dhan) iyo Atkinson (goob wadaageedka jiray) Barnaamijka DLI Isbaanishka ee hadda jira waxaa ku biiray barnaamijka laba-dhinac laha ah ee hadda ka baxa Bridger. Lent wuxuu u beddelmayaa qaabka waxbarashada Isbaanishka DLI ee dugsiga oo dhan oo leh aag amaansho. Ardayda dhigata barnaamijka xaafadda Lent waxaa lagu martiqadi doonaa inay ku biiraan barnaamijka DLI ee Isbaanishka ama waxay isticmaali karaan ikhtiyaarka ah inay ku biiraan dugsiga xaafadooda u dhow. Barnaamijka DLI ee Isbaanishka ee Atkinson ayaa weli ahaan sida uu yahay.

Shiinayska DLI ee heerka K-5 wuxuu ku nagaanayaa Clark (oo hore u ahaan jiray Harrison Park) iyo Woodstock, ee goobtooda qaab wadaaga ee horay u jirtay. Barnaamijka Clark waa hal-dhinac, barnaamijka Woodstock-na waa laba-dhinac.

Qoddobada ugu muhiimsan:

Kellogg ayaa isdiiwaangelintiisu buux dhaafi doontaa haddii aan hal ma dhowr barnaamij oo xaafadeed meel kale loo rarin.

Xaafada Atkinson K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Harrison Park. Xulashadani waxay keeni doontaa kala qaybsanaata u gudbinta Atkinson ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka isbaanishka DLI, maadaama barnaamijkaisbaanishka DLI uu u gudbin doono Kellogg. Waxa kale oo ay keenaysaa kala qaybsanaanta u gudbinta heerka dugsiga sare Harrison Park waxa la filayaa in uu u gudbiyo McDaniels High School iyo Atkinson waxa uu ku ag yaalaa Franklin High School.

Xaafada Creston K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Hosford. Tani waa si looga foggaado buuxdhafinta Kellogg iyo yaraanshaha isdiiwaangelinta ee Hosford.

Xaafada Lewis K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Lane (sida ku cad Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta C). Tani waxay keenaysaa in isdiiwaangelinta Sellwood Middle School ay hoos uga dhacdo 500.

Kheyraadka Xulashada E1:

[Guudmarka tirakoobka E1](#)

[Tubta sawirka u gudbiyaha E1](#)

[E1 tallaabooyinka saameynta sinnaanta jinsiyadeed](#)

Qoddobada ugu muhiimsan:

K-5 Shiinayska DLI ee Clark iyo Woodstock waxay ardayda u gudbinayaan Kellogg. Tani waxay keeni doontaa kala qaybsanaanta u gudbiyaha Clark iyo Woodstock ee u dhaxaysa barnaamijyadooada xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Shiinayska,

K-5 Isbaanishka DLI ee Lent (dugsiga oo dhan) iyo Atkinson (kula yaal) waxay u gudbinayaan Harrison Park. Tani waxay keeni doontaa kala qaybsanaanta u gudbiyaha Atkinson ee u dhaxaysa barnaamijka xaafadda iyo barnaamijka DLI ee Isbaanishka,

Xaafada Lewis K-5 waxay ardayda u gudbinaysaa Lane (sida ku cad Qabyo-qoraalka Soo-jeedinta C). Tani waxay keenaysaa in isdiiwaangelinta Sellwood Middle School ay hoos uga dhacdo 500.

Kheyraadka Xulashada E2:

[Guudmarka tirakoobka E2](#)

[Tubta sawirka u gudbiyaha E2](#)

[E2 tallaabooyinka saameynta sinnaanta jinsiyadeed](#)